ismaamulka san diego





*BMP-yada Geedaha lagu beeray*

# BMP-yada Sifaynta qashinka Xoolaha Qorshaha Maamulka Wabiyada (HMP)

**Maamulka ugu fiican ee Nidaamka Dhismaha Biyaha Daadka (BMPs) ayaa lagu rakibaa dhismeyaasha qaar oo ku yaala Ismaamulka si ay gacan uga gaystaan kahortaga maadooyinka wasaqda ah sida qashinka, daawooyinka bacriminta beeraha, sunta cayayaanka, iyo qaruuraxa soo gala marinnada biyaha daadka roobka kadibna galaaya baliyadda, wabiyada, iyo badwaynta deegaankeena. Gurigaaga waa mid kamid ah boqolaalka ku yaala Ismaamulkeena oo leh ugu yaraan hal BMP.**

**Diiwaanadeena ayaa muujinaaya Inaad haysato ugu yaraan hal BMP-ga baasinka HMP oo ku xiran dhismahaaga.** Si ay kaaga caawiso joogtaynta BMP-gaan **Barnaamijka Ilaalinta Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego** ayaa ku siinaaya buugaan xogta si looga jawaabo su'aalaha aad ka qabi karto BMP-yada iyo sida aad u joogtaynayso.

## *BMP-yadu Waxay Nadiifiyaan Marinnada Biyaheena*

BMP-yadaada waxaa loo sameeyay inay maadooyinka wasaqda ah ka saaraan biyaha roobka ee kasoo dareera dhismahaaga ilaa heerka u sareeya ee suuragalka ah. Maadaama aad tahay mulkiilaha mid kamid ah dhismeyaashaan, xeerarka ismaamulka ayaa kaa doonaaya inaad **samayso kormeer joogto ah iyo talaabooyinka dayactirka** si loo hubiyo in BMP-yadaada si sax ah u shaqaynayaan.

SAWIRKA 1 *Sifaynta Baliga biyaha HMP ga*




## *Sida BMP-gaaga HMP ga Baasinku u Shaqeeyo*

BMP-yada HMP baasinka ayaa ka difaaca balideena, wabiyada, iyo badaha asagoo kaydiya kadibna miira biyaha daadka ee kanaallada. Kadib marka wasaqdu fariisato salka, duleelka baasinka ayaa intaas kadib siidaaya biyaha daadka oo la miiray oo ku socda heer xakamaysan kuna socdal qulqul la xakameeyay (ama "qulqul yar") (arag sawirka 2 aad).

xog dheeraad ah > > >

# BMP-yada Biyaha Wabiyada

SAWIRKA 2 ***Faahfaahinta Daboolka Duleelka Xakamaynta Qulqulka***




Duleelka qulqulka hooseeya, oo ku yaala dusah sare ee Qulqulka hooseeya, ayaa usahlaaya biyaha daadka in lagu fasaxo heer xakamaysan, taasoo yaraynaysa xaarista ciida.



*Balaca Duleelka ayaa La cabirayaa*



*Dusha biyo Mareen Duleel leh*

## *Hel oo Hayso BMP-gaaga*

BMP-yada warta HMP ayaa noqota aag hooseeya oo biyaha daadku kusoo aruuraan. Sidoo kale waa meelo qalalan, marka laga reebo xiliyada roobka badan da'aayo. Sabab la xariirta in BMP-yada Warta HMP ay wasaqda ka saaraan biyaha daadka ayna ka hortagaan xaarista ciida, waa muhiim in la kormeero lana ilaaliyo. ***Hoos waxaad ka helaysaa dhawr shaqooyinka dayactirka ah si aad u samayso:***

- **Firii haddii qulqulka nabaad guuriga uu joogo. Ugu rakiib dabaalka si sax qorshahiibadda haddii uu nabad guur jiro.**
- **Xaqiiji in furka ugu danbeeya ee tuubadu uu leeyahay duleel qulqul yar maraayo. U qod duleelka si waafaqsan qorsheyaasha haddii uusan jirin.**
- **Bixi qashin kasta ama wasaqda ku aruurta warta. Ka sifee qashinka marinnada biyaha, duleellada iyo marinka qulqulka yareeya.**
- **Gaabi geedaha aadka u soo baxa kahor Inta uu xili roobaadka bilaabanin roobaadku (Oktoobar 1 deeda ilaa Abriil 30 keeda).**
- **Beddel dhulka geeduhu ka baxeen ama dhoobada ee biyhu qaadeen ama kasii daray.**
- **Buuxi duleellada ay biyuhu fariisan karaan wax ka badan 96 saacadood (si loo yareeyo in kaneeco ka dhalato).**

Si aad u hesho liiska shaqooyinka kale, ka fiiri foomka xaqiijinta dayactirka ama qorsheyaasha dayactirka ee ka yimaada ee shirkada dhistay gurigaaga.

waad ku mahadsan tahay samaynta qaybtaada si
loo ilaaliyo marinadeena biyaha

## Maxaan U baahanahay Inaan sameeyo?

Sanad kasta, wakiil ka socda Ismaamulka ayaa kulasoo xariiraaya si uu kormeer ugu sameeyo BMP-yadaada goobta. Ku fashilmida samaynta dayactirka BMP-yadaada ayaa dhalin karta fulinta baaritaan ama kormeerka dabagalka ah oo uu samaynaayo wakiilka Ismaamulku.

## *Haddii aad qabto su'aalo, Nagalasoo Xariir:*

**Barnaamijka Ilaalinta Waraha Biyaha**
Taleefanka **1-858-495-5323**
Iimeelka **BMP.Program@sdcounty.ca.gov**
Booqo **www.sandiegocounty.gov/stormwater**